Ku soo dhawow sawiridda gudaha isha

Cudurka sonkorowgu ama kaadimacaanka (Diabetes) wuxuu siyaabo kala duwan saameyn ugu yeeshaa jirkaaga. Tusaale ahaan wuxuu isbeddel ku dhici karaa xididdada jirka oo ay ka mid yihiin xididdada xuubkta gudaha isha. Cillidaha cudurka sonkorowgu u keeno xuubka gudaha isha ilaa hadda daawo looma hayo, laakiin waxaa badanaaba la hakin karaa socodka cudurka haddii goor hore la ogaado isbeddelkaas. Cudurku waa mid tartartiib kuu soo gala, isbeddelkuna waa mid aan bilowga hore lahayn astaamo lagu garto, taas oo ka dhigan in heerka araggu noqdo mid caadi ah oo aadan wax isbeddel ah ka dareemeyn.

Haddaba, baaritaanka aan ku sameynno gudaha ishaada waxaan goor hore ku ogaaneynnaa wixii isbeddel ah, waa ka hor inta aan astaamo laga dareemin. Taasina waa mid muhiim ah maadaama haddii lagaa daaweeyo intaan aragga wax soo gaarin waxay taasi sii kordhineysaa fursadda in araggu sidiisa sii ahaado.

Sidee sawirqaadiddaasi u dhacaysaa?

Marka baaritaanka la samaynayo waxaad la kulmeysaa kalkaaliye caafimaadka indhaha oo indhaha kaaga shubaya daawo dhibco ah oo bu'da indhaha weyneysa. Qiyaastii soddon daqiiqo kadib marka ay bu'da ishu sidii la rabay u ballaarato, ayuu kalkaaliyaha caafimaadka indhuhu sawirka ka qaadayaa xuubka gudaha isha, isagoo isticmaalaya kaamirad loogu talagalay in indhaha guntooda lagu sawiro.

Bu'da ishu waxay sidaas u weynaaneysaa muddo laba saac, mararka qaarkoodna ilaa maalinta dambe. Ilaa inta ay bu'da ishu ku soo noqoneyso sideedii hore waxaa laga yaabaa in araggu daciifo, marka waa in aad iska ilaalisaa inaad waddo baabuur. Waxaa kaloo laga yaabaa inaad ku cawiranto iftiinka xoogga badan, waxaadse dhibaatadaas uga hortegi kartaa muraayadaha qorraxda laga xirto.

In sawir laga qaado indhaha guntoodu waa habka ugu wanaagsan oo goor hore lagu ogaan karo isbeddelka cudurka macaanku u keeno xuubka gudaha indhaha.

Goormaad heleysaa jawaab?

Sawirada waxaa baaritaan ku samaynaya kalkaaliyaha caafimaadka indhaha oo jawaab toos ah kaa siinaya haddii wax waliba si wanaagsan u muuqdaan.

Haddiise loo baahan yahay in baaritaan dheeraad ah lagu sameeyo sawirada, waxaa kolkaas baaritaan ku samaynaya dhakhtar indhaha oo jawaabta u diraya dhakhtarkaaga cudurka sonkorowga. Mar walba oo aad isbitaalka u tegeyso in indhaha sawir laga qaado, waa in uu dhakhtarkaaga cudurka sonkorowgu soo gudbiyaa warqad talabixin ah oo saabsan taariikhdaada caafimaad iyo heerka xanuunkaagu marayo.

Haddii isbeddelka indhaha gudahooda loo arko in si dhab ah loo eego, waxaa laguugu yeerayaa dhakhtarka indhaha si baaritaan dheeraad ah laguugu ›

S:t Eriks Ögonsjukhus AB
Polhemsgatan 50 (irridda Fleminggatan), 112 82 Stockholm
Telafoon 08-672 30 00 | www.sankterik.se

Vi är en del av Stockholms läns landsting

sameeyo oo la go'aamiyo wixii daawo ah oo loo baahdo.

Waa maxay diabetesretinopati?

Ereyga diabetesretinopati waa micne guud oo ku saabsan cudurada isbeddelka ah oo uu cudurka sonkorowgu u keeno xuubka gudaha indhaha.

Saddex meelood oo meel dadka qaba cudurka sonkorowga waxaa ku nooc isbeddel ah oo ka mid ah isbeddelada xuubka gudaha indhaha. Boqolkiiba 10 ilaa 35 ka mid ah dadkaas wuxuu isbeddelkaasi dhaawac gaarsiiyaa araggooda.

Maxaa isha ku dhacaya?

Xuubka guduhu wuxuu dahaaraa gudaha wareegga isha. Qaybta muhiimka ah xuubka gudaha insha waxaa lagu magacaabaa barta huruudda ama jaallada ah. Barta jaallada ahi waxay u taagan tahay arag-badnaanta iyo awoodda in la arko waxyaalo yaryar. Xuubka gudaha isha waxaa ku samaysan tiro badan oo xididdo yaryar oo lagu magacaabo kabbilaaryo. Heerka sonkorta dhiigga oo sare u kacda waxay sababtaa in gidaarada xididdada kabbilaaryadu waqti kadib daciifaan oo bilaabaan in dhacaan ka soo daato.

Dhacaankaas soo daataana wuxuu sababaa in xuubka ku dahaaran gudaha ishu bararo. Haddii uu bararkaasi saameyn ku yeesho barta jaallada ah waxaa kolkaas xumaada aragga.

waxaa kaloo xirmi kara xididdada yaryar ee dhiigga. Taasina waxay sababtaa in socodka dhiiggu daciifo oo ay neefta oksajiintu ku yaraato xuubka gudaha isha. Xuubka gudaha ishu wuxuu markaas isku dayaa in uu kabo oksajiinka yaraday isgaoo soo deynaya dhacaanno kala duwan, oo loo yaqaan qaybaha korriinka. Kuwaasina waxaydardargeliyaan samayska xididdo cudub. Bals exididdadaas cusubi waa kuwo daciif ah oo dhaqso u dillaaca.



Markaas waxaa isha ku furmo dhiig sababa aragga oo dhaqso u xumada. Dhakhtarka indhuhuna waa in uu mar walba wax ka qabtaa dhiigbaxaas. Haddii aan wax laga qaban waxaa imaneysa khatar ah in uu haar reebo ama xuubka gudaha ishu soo fuqo ama araggu si joogto ah oo aad ah u daciifo.

Waxyaalaha khatarta keeni kara

Waxaa jira dhawr sababood oo saamayn ku yeelan kara xawliga iyo baaxadda isbeddeladaas.
Waxyaalaha ugu muhiimsan oo khatarta keeni kara:

- Ilaa inta la qabay cudurka sonkorowga
- Heerka sonkorta dhiigga oo aan wanaagsanayn
- Dhiigkar heer sare
- Heerka dufanka dhiigga oo aan caadi ahayn
- Isbeddelada hormoonada

Sii wadidda la socodka

Haddii isbeddelada xuubka gudaha ishu yahay mid sahlan ama aan sidaas u weyneyn, markaas badan-aaba looma baahna in daawo lagu isticmaalo. Waxaa ku filan oo joojin kara haddii la hagaajiyo heerka sonkorta dhiigga, heerka cadaadiska dhiigga iyo heerka dufanka dhiigga oo mararka qaarkood joojiya kororka isbeddelada. Haddaba waxaa muhiim ah in lala socdo isbeddeladaas oo si joogto loo sawiro ama dhakhtar baaritaan ugu sameeyo.

S:T ERIKS
ÖGON
SJUKHUS

sankterik.se

S:t Eriks Ögonsjukhus AB wuxuu ka mid yahay isbitaalada indhaha ee Yurub ugu horreeya. Waxaan ku hawllanahay daaweynta joogto ah iyo mid degdeg ah ee cudurada indhaha. Waxaan sannad walba qaabbilnaa in ka badan 200 000 oo bukaansocod ah oo ka kala socda Iswiidhen iyo dalka dibeddiisa. Annaga iyo Jaama-cadda caafimaadka ee Karolinska Institutet waxaan ku hawllanahay cilmibaaris, iyo horumarinta iyo waxbarashada daryeelka indhaha. S:t Eriks Ögonsjukhus oo ay ka shaqeeyaan 370 oo qof waxaa leh maamulka gobolka Stockholm u qaabbilsan adeegga iyo gargaarka bulshada.